

## **Sharciyada amaahda (Låneregler)**

### **Sharciga Amaahda**

**Sidan hoos ku qoran ayaad Maktabada (bibliotek) Magalada Eskilstuna wax uga amaahan kartaa**

### **Kaarka amaahda (Lånekort)**

Waxad u baahan tahay kaarka amaahda si aad maktabada wax uga amaahato.

Kaarka amaahda waa bilaa lacag (bilaash).

Adiga waa in aad tustaa waqaada aqoonsiga (legitimation) marka aad dooneysid in aad sameysatid kaarka buugaagta lagu amaahdo.

Hadii ay da'daadu ka yar yahay 18 jir, waxa ku sameyn kara kaarka buugaagta lagu amaahdo waalidkaaga

### **Lambarka sirta ah (Pin –kod)**

Adiga waxa lagu siinayaa lambar sirta ah, marka lagu siinaayo kaarka amaahda.

Lambarka sirta ah waxa uu ka kooban yahay afar (4) lambar.

Waxad u isticmaali kartaa lambarka sirta ah, marka aad amaahaneysid boogaagta oo aad isticmaaleysid mashiinka wax amaahinta.

### **Wakhtiga amaahda (lånetid)**

Wakhtiga amaahda , waa wakhtiga khuseeya wakhtiga aad wax amaahatay.

Wakhtiga amaahda ee buugaata waa afar (4) asbuuc.

Filimada, Jaraa'ida (wargeysyada, ama joornaalada) iyo Tv- cayaarta (tv-spel) waxa la amaahdaa wakhti gaaban.

### **Hadii aad dooneysid in aad amaahatid mar labaad (Låna om)**

Hadii aadan ka gaarin in aad buuga oo dhan aad akhrisid, oo uu wakhtiga amaahda ka dhamaado, waxaad amaahan kartaa buugaas mar labaad, waxa shardi ah in uusan qof kale ku jirin safka , oo doonaya in uu amaahdo buuga.

Qofka ma amahan karo buuga in ka badan seddex (3) jeer

### **In aad dalbatid buugaag (Beställa böcker)**

Adiga waxaad geleysaa safka, hadii buuga aad dooneysid la amaahday mar hore.

Markii buuga la soo celiyo , meel ayaan ku dhigeynaa adiga

Waxa lagu soo dirayaa adiga, waraaq sheegeysa in uu buugii la keenay. Waraaqda waxa kale oo ku qoran wakhtiga ugu dambeyn aad qaadan kartid buuga

Waxa kale oo waraaqda ku qoran lambar (kod), lambarkaas waa in aad soo qaadataa marka aad qaadaneysid buuga.

Hadii aad dooneysid waxan kuugu soo diri karnaa akhbaarta oo dhan e- mail, ama sms, halkii waraaqda laguugu soo diri lahaa

## **In aad mar labaad amaahato ama aad ka dalbato amaahda web-ka (Internetkatalog)**

Meesha ama barta internetka aad ka dalban kartid ama ka amaahan kartid buugaagta waa [www.eskilstuna.se/biblioteket](http://www.eskilstuna.se/biblioteket) Waxad isticmaali kartaa lambarkaaga sirta ah oo aad geli kartaa meesha kaydka buugaagta ee maktabata (bibliotekets katalog)

### **Fikrad soo jeedin ku aadan in aan wax soo iibino (Föreslå inköp)**

Annaga waan qaadaneynaa fikrada ah in aan wax soo iibino. Adiga qof ahaan fikradaada waad qori kartaa ku saabsan in aan soo iibino buuug, waxaad ku qori kartaa Web-ka maktabada qaybta kaydka buugaagta (bibliotekskatalogen) ee internetka.

Hadii kale waxad fikradaada ku saabsan in aan soo iibino buug gaar ah , u sheegi kartaa shaqaalaha maktabada.

Markii buugaas la keeno , waan kula soo socodsiiineynaa, hadii xataa buugaas aan la keenin waan kula soo socodsiiineynaa

### **Ka taxaddar oo ilaasho karkaaga aad wax ku amaahatid**

Hadii uu kaa lumo kaarka amaahda, waxa khasab ah in aad u sheegtid shaqaalaha maktabada.

Si aan u joojino (xanibno), si uusan qof kale ugu amaahan kaarkii kaa lumay

Hadii uu ka lumo kaarkaaga amaahda waxad bixineysaa kharaj si laguugu sameeyo kaar cusub.

Weligaa ha u ogo laan qof kale in uu wax ku amaahdo kaarkaaga (kaadhkaaga).

Adiga shaqsiyan ayaa ka masuul ah hadii qof kale wax ku amaahdo kaarkaaga (kaadhkaaga)

### **Soo celi waxa aad amaahato wakhtigii loogu tala galay**

Hadii aadan soo celin waxii aad amaahatay wakhtigii loogu tala galay, ama wakhtigii lagu qabtay waxad bixineysaa takhsiir ama lacag ganaax ah

U sheeg shaqaalaha maktabada , hadii aad u baahan tahay in lagu soo wergeliyo inta uusan wakhtiga amaahda ka dhamanin (ka dhicin)

Markaas waxan ku soo direynaa dhabmaal waxan kuugu soo direynaa e mail-ka, dhambaalkaas oo aan ku soo direyno seddex (3) beri ka hor inta uusan kaa dhicin wakhtiga.

Hadii aadan soo celin wixii aad amaahatay, waxan ku soo direynaa xusuusin qiyaastii hal asbuuc kedib.

Hadii aadan soo celin , waxan ku soo direynaa kharaj (ganaax lacag ah) laba asbuuc kedib.

Marka waa inaad bixisaa lacagtaas ama aad soo celisaa buugii, inta aadan mar labaad ka amaahan buug kale maktabada.

Hadii lagugu leeyaay deyn ah 100 karoon ama lacag ka badan, laguma ogola in aad ka amaahatid buug maktabada intii aad ka bixineysid deynta.